


Baadhitaannada afka ilma galeenka (baaritaanka Pap) iyo baaritaanka raajada naasaha ee mammogram oo bilaash ah



Booqo mnsage.com | Wac 1-888-643-2584

Sage ayaa diyaar kuu ah si ay kuu caawiso.

Sage waxay dabooshaa:

- Baaritaanka caafimaadka ee sanad kasta kaas oo lagu sameeyo naasaha iyo miskaha inta ku xeeran.
- Baaritaanka raajada naasaha ee mammogram oo sannad kasta ah looguna talagalay dadka da'doodu u dhaxeeyso 40-64.
- Baaritaanka afka ilma galeenka (baaritaanka Pap) 3Pap) 3dii sanaba mar, ama baaritaanka afka ilma galeenka (baaritaanka Pap) iyo kan HPV ga 5tii sanaba mar, ama HPV kaliya 5tii sanaba mar ee dadka da'doodu u dhaxeeyso 30-64.
- Ballamaha caafimaadka ee daba-galka ah iyo/ama baaritaanka ogaanshaha ee mar kasta oo la arko natiijo aan caadi ahayn naasaha la baaro ama baaritaanka ilmo galeenka ee dumarka da'doodu u dhaxeeyso 30-64.

Sage ma daboosho daaweynta, laakiin bukaannada Sage ee aan caymiska caafimaadka heysan waxaa laga yaabaa in ay u qalmaan adeegyada daawaynta iyada oo loo marayo hay'adaha Kaalmada Caafimaadka ee Kansarka Naaska iyo Makaanka afkiisa (Medical Assistance for Breast and Cervical Cancer [MA-BC]) ama Gargaarka Caafimaadka Degdegga ah (Emergency Medical Assistance [EMA]).

Ka qayb gal barnaamijkan baarista kansarka ee bilaashka ah hadii:

- Aad tahay 30-64 jir.
- Aadan lahayn caymis caafimaad.
- Aad leedahay caymis caafimaad laakiin waxaa lagaa rabaa qeyb-bixin (co-pay) ama waxaa jirta lacagta horay-u-bixinta ee aan weli la gaarin (unmet deductible).
- Caymiskaaga caafimaadku uusan bixineynin baaritaanka afka ilma galeenka (baaritaanka Pap) ama baaritaanka raajada naasaha ee mammogram.
- Dakhliga qoyskaaga soo gala uu waafaqsan yahay habraaca.